# XAQ AYAAD LEEDAHAY HADDII RABSHO MAXALI AH KU QABSATO

Difaaca ay kuusameyn karaan booliska, sharciga rayidka iyo dambiyada

BIG KOORDINIERUNG

Bei häuslicher Gewalt · Hilfe für Frauen und ihre Kinder

Somali

BIG e.V.
Bei häuslicher Gewalt · Hilfe für Frauen und ihre Kinder

BIG KOORDINIERUNG BIG HOTLINE BIG PRÄVENTION

BIG e.V.
Ololaha kadhanka ah xadgudubyada lagula kaco haweenka ayna saamaysay magaalada Berlin
11 a -Durlacher Str. Berlin 10715
Tel. 030-61 70 91 00
Fakis 030-61 70 91 01
mail@bigkoordinierung.de
www.big-berlin.info

Berlin, 2016, 1. Soo saarida
Qoraalkaan waxaa lagu daabacay caawimaad laga helay maamulka Aqalka sare uqaabilsan Caafimaadka, Daryeelka iyo Sinaanta

Senatsverwaltung
für Gesundheit, Pflege
und Gleichstellung

be Berlin

## Xadgudubka haweenka kadhaanka ah wuxuu kadhacaa inta badan meelaha ay ku noolyihiin, tusaale, guriga.

Kudhawaad 4 tii. haweenka Jarmalka ee ku nool midkood oo ka weyn da'da 15 waxaa saameeyay xadgudubka. Tani waxay ka dhigan tahay inay la kulanto xadgudub jirka, dareenka iyo/ama galmada oo ka yimaada xoog kala duwan oo ninkeedii hore ama qof kale ah. Tani waa natiijada cilmi baaris ay sameysay Waaxda Yururb ee u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha sanadkii 2014, kaas oo ilaa iyo 1500 oo haween ah lagu wareystay Jarmalka. Xadgudubkaan waxaa badanaa ku kaca raga. Meelaha qaar, waxay sababtaa dhaawacyo xunxun iyo meesha ugu xun, waxay keeni kartaa geeri. Sanadka 2015, 131 haween ayaa u dhintay natiijada xadgudub ninankoodu ay ku sameeyeen Jarmalka dhexdiisa (BKA [= Bundeskriminalamt waxay la midtahay Waaxda Qaran ee Dambiyada Igiriiska (UK) cilmi baarista 2016).

Xadgudubyada maxaliga ah waxaa loogu kacaa qaabab kala duwan oo hab nololeedka u dhaxeeya labada lamaanaha ah. Waxay saameyn kartaa raga xiriirku kala dhaxeeyo haweeneey ama nin kale; waxay sidoo kale ka dhacdaa xiriirada haweenka u dhaxeeya*.

Boqolkiiba 60 dhacdooyinka xadgudubyada maxaliga ah, waxaa ku jira caruur reerka lanool. Aragtida iyo inay laqabsadaan xadgudubka waxay waxyeeleyn kartaa kobaca jirka, maskaxda, dareenka iyo mid bulsho ee caruurta sidaas awgeedna **waxay saameysaa** fiicnaanta jiritaanka **caruurnimo**

* Kuwaan soosocda, qoraalku wuxuu badanaa ka hadlayaa xadgudubka kadhanka ah haweenka ee ragu ku kacaan.

Xaalado gaar ah, sida xadgudub xun ama caruurta yaryar, dhaawacyada maxkaxda ah ayaa imaan kara. Sidaa awgeed, xaalada xadgudubka waa in si degdeg ah loo joojiyo, talaabooyin lagu difaacaayo haweenka iyo caruurtana waa in si degdeg ah loo qaadaa.

**Makala kulmeysaa xadgudub lamaanahaaaga, guurkaaga ama qoyska?**

- Ma lagu caayay, lagu fududeystay ama lagu bahdilay?
- Madareemeysaa maseyr badan oo aad loo xakameeyo?
- Miyaan laguu ogoleyn inaad ikhtiyaar yeelato waxaad rabto inaad sameyso, lacagtaadase malagaa xoogaa?
- Ma laguugu xadgudbaa, garaacaa, dhaawacaa, laguu hanjabaa ama lagu xabisaa?
- Ma laguugu qasbaa falal galmo, kufsi ah?
- Malagu dhibaa, hanjabaa laguna dabasocdaa (ayadoo logu dabajoogo)?

## HADABA WAXAAD XAQ ULEEDAHAY INAAD ISDIFAACDO!

Falalkaas kore waa laysku ciqaabaa waxaana ciqaabo booliska iyo sharciga (tusaale, waxyeelada jirka ah, xoriyad ka qaadid, xadgudubyada kadhan ah dookha galmo ee shaqsiga).

**Madooneysaa inaad gacan siiso dadka waxyeeloobay?**

- Maku aragtay xadgudub qoyskaaga, bulshadaada ama goobtaada shaqada?
- Ma leedahay saaxiib, ama qof qaraabo ah, qof guriga kula dagan, macmiil ama bukaan oo kuu sheegay xadgudub uu kula kacay lamaana heedii horay u jirtay?
- Ma utahay lataliye macaamiisha ku waa soo aad umaleyneyso inay la ildaranyihiin xadgdub maxali ah?

Qoraalkaan dhexdiisa, waxaa sidoo kale uga hadleynaa adiga oo ah qaraabo, daris*, saaxiib* ama qabiir ku taqasusay bulshada iyo daryeelka caafimaadka, adeegyadaada ama maamulkaaga.

Haddii aad tahay dhibane ama caawiya dhibanayaasha xadgudubka*:
**Qoraalkaan dhexdiisa, waxaa kuugu sheegeynaa xuquuqda haweenka si looga hortago xadgudubka maxaliga ah isaga difaacaan iyaga iyo caruurtoodaba in falal xadgudub kale lagu sameeyo.**

Qeybta **1aad** ee qoraalkaan, waxaad arki kartaa hordhaca sida boolisku u difaaci karaan dhibanaha ayna uga hortagaan xadgudubka. Waxaan bixinaa macluumaad ku saabsan talaabooyinka ay haweenku qaadi karaan si ay u ilaaliyaan badqabkooda iyo tan caruurtooda (bogga 6-13).

Qeybta **2aad** waxaan ku sharxeynaa sida dacwadaha dambiyada loofuro, doorka iyo xuquuqda uu leeyahay marqaatiga dacwadu, iyo halka laga heli karo caawimaad dheeraad ah oo macquul ah iyo talo siin (boggaga 14-17).

**Qeybta 3aad** Qoraalkaan wuxuu sharxayaa habaka layskaga difaaco falalka xadgudubka dheeriga ah adigoo marayo sharciga madaniga ah. Waxaan tusinaa sida amar joojinta mamnuucaya la xiriirida looga qaadan karo maxkamada, ama sida qofku uu iskaga ilaalin karo in dulmiiluhu uu lasii daganaado (boggaga 18-24).

## Waa maxay xadgudub maxali ah?

Xadgudub maxali' (ayadoon loofiirineyn meesha shilku kadhacay) waxaa loola jeedaa dambiyada dagaal ee udhexeeya shaqsiyaadka lamaanaha ah / xiriirku kadhexeeyo,

- taaso hada jirta
- taasoo dhamaad kudhow ama
- mid horay loo dhameeyay

ama

- dadka qaraabada ah, ilaa iyo inta aysan halis ku aheyn caruurta.

Xadgudubka maxaliga ah (sidoo kale loo yaqaano dagaalka muuqda) wuxuu halis kuyahay fayadhawrka ilmaha.*

* Qeexitaanka guud ayadoo loofiirinaayo Maamulka Aqalka sare ee Taageerida / Maamulka Aqalka sare ee Cadaalada iyo Arimaha Guriga 10/2001

## Difaaca booliska

Xarunta booliska Berlin, shaqaalaha rayidka ah oo khibrad iyo waayo aragnimo leh ayaa ka shaqeeya dacwadaha xadgudubka maxaliga ah iyo xadgudubyada galmada.

**booliska waxay heegan yihiin 24 saac maalintii, waxaana lagu wici karaa si bilaash ah.**

**Haddii aad booliska wacdo:**
**Fadlan la wadaag,**

- Haddii aad markaas halis kujirto iyo in kale (makuu dhawyahay dulmiiluhu)?
- Waayo ama waa maxay sababtaa halista, qofkee ama maxaa sababay dhaawacaaga (tusaale, mindi, garaacid...)

**Haddii dulmiiluhu uusan joogin ama kuudhaweyn, wargeli booliska**

- haddii aad waajaheyso **halis** degdeg ah oo xadgudub,
- haddii dulmiiluhu uu hub wato

Sababahaas ayaa keeno in boolisku uu kuu soo diro ciidan degdeg oo si gaar ah kujiro.

Ilaa boolisku ka imaadaan, gal meel badqabta ah, tusaale, la joog dariska, dukaamada, ama gurigaaga ku dhexdhuumo.

Usheeg booliska meesha ay kuugu imaan karaan.

**Marka booliska imaadaan, meel ka baxsan dulmiilaha ayaa lagugu wareysanayaa waadna sharaxi kartaa xaaladaada. Haddii aad ku jirto halis daran ama xadgudub dambi horay laguugula kacay,**

- Ugu qeex booliska si faahfaahsan wixii dhacay, si ay uqaadaan talaabooyinka ku haboon si laguu difaaco loona ciqaabo dulmiilaha/dambiilaha.
- Sidoo kale waa inaad soo wargelisaa dhaawacyada aanan la arki karin iyo kuwa la soo dhaafay,
- Haddii ay macquul tahay, sheeg marqaatiyaal,
- sidoo kale u dhiib wixii hub ah / qalab loo isticmaalay in dambiga lagu galo.

**Waxaa iskaga tagi kartaa goobta dambigu kadhacay adoo difaac ka helaya booliska, si**

- aad meel badqabta u tagto (tusaale, xarunta haweenka),
- aad u hesho daryeel caafimaad ama
- caawimaad lagaa siiyo inay qorto dhaawacyada iyo calaamadaha ee dambiga lagugula kacay.

**Ka eryida dambiilaha waa suurtogal**

Booliska waxay ka saari karaan dambiilaha dhismaha, ka qaadan karaan furaha waxay kamamnuuci karaan inuu deegaanka soo galo markale. Ka eryidaan iyo mamnuucidaan soogalida waxay jiri kartaa 14 maalmood, haddii ay jirto halis ah in dambiiluhu markale xadgudub kugula kaco adiga iyo / ama caruurta.

## Amar lagu hor istaagaayo dambiilaha waa suuragal

Intaas waxaa sii dheer, boolisku waxay ka mamnuuci karaan dambiilaha inuu kuu imaado uuna kulasoo xariiro adiga iyo / ama caruurta. Mamnuucaan wuxuu sidoo kale jiri karaa dhawr maalmood wuxuu ku xiranyahay meesha ay tahay inaad joogtid (tusaale, goobta shaqada, xarunta xanaanada maalintii / dugsiga).

## In la xiro dambiilaha waa suuragal

Booliska sidoo kala waxaa lafaraa inay si kumeelgaar ah uxiraan dambiilaha haddii aan halista daran xalinin karin. Si laguugu wargaliyo xabsi ka siideynta lamaanahaaga, fadlan u sheeg saraakiisha meesha lagaala soo xiriiraayo teleefon ahaan.

## Maqabtaa su'aalo dheeraad ah?

Fadlan la xiriir booliska wixii suaalo dheeraad ah oo quseeya difaacaaga iyo caawimaada haweenka dhibanaha ah, iyo talaabooyinka sharciga ee qaadi karto.

**BIG Leenka - Tel. (030) 611 03 00**

Waad la xiriiri kartaa BIG leenkooda maalin iyo habeenba, maalmaha fasaxa iyo fasaxyada, adigoo isticmaalaya lambarka teleefonka lagu siiyay.

Haddii aad jeceshahay in shaqaalaha leenka BIG inay kusoo wacaan, booliska ayaa teleefan nambarkaaga ugudbinaaya leenka BIG, ayagoo fasax kaaga qaadanaaya. Xitaa haddaan boolis ku jirin dacwadaada waad codsan kartaa **talaabooyinka** waqtiga dheer ee sharciga madaniga ah iyadoo la raacayo sharciga xadgudubka, tusaale, in lagu dajiyo meel, iyo amar waqti dheer jiraayo kaas oo qofka ka mamnuucayo inuu kula soo xiriiro uuna kuu imaado (araga bogga 18-ka Dookhyada Xuquuqda Madaniga ah').

## Waxaad gudbin kartaa dacwad boolis.

Booliska waxay amar ku qabaan inay wargelinada qabtaan. Kuwaan waxaa lagu qori karaa, tusaale, qofka ama qoraal ahaan, dariska loo sheego, xubnaha qoyska, booliska ama adigu. Booliska ayaa xareynayo macluumaadkaaga shaqsiga ah. Markay jirto halis gaar ah, waxaa lagaa rabaa inaad sheegto ciwaan aan ka aheyn kaad dagantahay, halkaasoo booliska ay kuugu imaan karaan. Kani wuxuu

noqon karaa ciwaanka xeer ilaaliyaha, saaxiib, ciwaanka goobtaada shaqo, xarunta caawinta, ama wax la mid ah.

Markaad aqbaarta sheekeysid, fadlan qeex waxa kugu dhacay. Boolisku wuxuu ku siinayaa 'buug yar oo ay ku qoranyihiin xaquuqdaada dacwad dambiyeed marka lagu dhaawaco oo wax laguu dhimo,'iyo nambarka dacwada ee boolisku baarayo.

Inta lagu jiro hawshaan, waxaad heli doontaa balamo laguugu yeerayo dhageysiga marqaatiyada sida aad warbixintaada kusheegtay **kuwaas oo lagama maarmaan u ah** sii wadida baaritaanka booliska. Haddii aadan imaan karin balanta, waxaad qabsan kartaa balan cusub sida ugu dhaqsiyaha badan. Waxaad latashankartaa xarun latalinta ah ama garyaqaan kahor intaan lagaarin taariikhdaan. Waa caadi in qof aad aaminsantahay u kaxeysato baarista, qofka cilmi nafsiga yaqaan (hoos fiiri) ama garyaqaan. Shaqsiyaadkaan waxay joogi karaam baaristaada.

## Daryeelaha cilmu nafsiga ah

Xaalado gaar ah awgeed, waxaad xaq sharci ah u leedahay inaad wadato daryeelaha cilmu nafsiga ah. Kani waa foom qaas u ah gacansiinta dhibanayaasha waqtiga dhageysiga dacwada ay socoto, taas oo aan ku jirin talada sharciga ah, aana cadeyn u aheyn xadgudub dambiga. Shaqadaan waxaa fuliya garyaqaan. Shaqada daryeelaha cilmi nafsiga waa inuu ku taageero dhammaan inta lagu jiro dhageysiga isagoo kuu noqonayo mid ku garabtaagan uuna yareeyo culeysyada ku haysta. Xaaladaha qaar, daryeelaha cilmi nafsigu wuu kuuraaci karaa waraysiyada wuuna kula joogi karaa inta maxkamada culus ay socoto.

Waxaad xaq uleedahay **daryeelaha caafimaad oo bilaash ah**, haddii

- aad tahay dhibane xadgudub xun ama xadgudub galmo lagula kacay,
- aadan si ku filan u garaneyn danahaaga shaqsiga ah,
- ay jirto baahi gaar ah oo difaaca
- ama aad yartahay.

Waa in lagu baraa soortagalnimada dacwadaada gaarka ah ayna ku siisaa xarun la talinta qaabilsan.

**Waxaad xaq uleedahay inaad diido marqaati bixinta**
Haddii aad xiriir sharci ah la leedahay, xiriirka idinka dhaxeeyo, aad is shukaansataan, aad isqabtaan, ama aad uur uleedahay dambiilaha, waxaad xaq uleedahay inaad marqaati bixiso. Tani waxay ka dhigantahay inaad go'aansan karto xili kasta inaadan marqaari furin. Feelka waa la keydinayaa mudo sannado ah. Haddii aad, waqtiga mustaqbalka, aad rabtid inaad warbixinta fiiriso, waxaad dib u bilaabi kartaa hawsha.

Haddii aad wax xadgudub ah la kulanto markale kadib marka warbixinta lagudbiyo, waa inaad si degdeg ah ugu sheegtaa qareenkaaga, dacwad oogaha guud iyo maxkamada. **Kaliya haddii aad kashifto xumaanta ninkaagi hore, ayaad caawimaad heli kartaa.**

## Ogeysiisyo Muhiim ah

- Soo gudbi dhammaan falalkii dambiga horay u dhacay, iyo sidoo kale hanjabaadihii, ee kaaga imaanaayay ninkaaga / lamaanahaaga, bilowgiiba.
- Lawadaag haddii aad cabsi ka qabto xadgudubyo dheeraad ah oo aadan ku jirin adiga, caruurtaada ama dadka kale oo raba inay ku caawiyaan.
- Magacaw dhammaan dadka maqlay ama arkay falka xadgudub.
- Haddii aad heysid, fadlan keen warbixinada caafimaadka ee quseeya dhaawacyada iyo caqabadaha ka dhashay (oo ay ku jiraan kuwii hore).
- Qor xasuus (joornaal) ee ku saabsan dhacdada. Ogow xaaladaha dhabta ah (taariikh, waqtiga, marqaatiga), hanjabaado dheerad ah ama xadgudub. Warbixinadaada waxay kaa caawinayaan dacwadaada maxkamada ee mustaqbalka.

- Hadday kugu yaalaan wax dhaawacyo ah, waa inaad u soo bandhigtaa dhaqtarkaaga ama farmashigaaga kana saartaa qarsoodiga waajibaadka caafimaadka, isla marka aad warbixinta gudbiso. Foom quseeya ayay boolisku ku siinayaan.

## Daaweynta caafimaad iyo shahaadooyinka.

**Haddii lagu dhaawaco**, waxaa ku daaweynayo dhaqtarka dookhaaga ah. Markay dhacdo xadgudub maxali ah, dhaawacyadaa waxaa lagu qiimeyn karaa xarunta Adeegyada Difaaca Bukaan socodka (bukaan socotka) Xadgudubka Charité, si bilaash ah, ayaa fiirinayo baaritaanka oo loo qori karo dhageysiga maxkamada. Waa inaad balan u qabsataa tan marka koobaad (fiiri bogga 30 / qeybta ciwaanka).

**Xadugudubyada galmada** waa inaad u aadaa isbitaal ama dhaqtar si degdeg ah dhacdada kadib si aad u qorto dhaawacyada iyo calaamadaha xadgudubka (hadday suurtogal tahay, sidoo kale sawiro ka qaad). **Waa muhiim inaadan isnadiifin ka hor intaan lagu baarin, xataa hadday tahay wax aad u xun inaad sidaas yeesho.** Waxyaalaha kale, dharka iyo surwaalada hoose, kuwaas oo ay ka muuqato astaamaha xadgudubka, waa in waraaq lagu qoro laguna wareejiyo booliska. Xaqiiji in dhaawacyadaada in la shahaadeeyo, si kastaba. Shahaadooyinka noocaas ah waxay aad muhiim ugu yihiin in lasugo cadeynta iyo in loo adeegsado dhageysiga dacwad dambiyeedka. Wixii ku saabsan dheeraadka dhagaysiga dacwad dambiyeedka (fiiri bogga 14)

## Haddii aad go'aansatay inaad ka guurto deegaanka.

Haddii aad ka guurto deegaanka, kaligaa ama adoo caruurtu kula socoto, waxaad ka heli kartaa guri iyo alaab meelaha u dhaw saacada ee guriyeyta haweenka ama qaxootiga (ka fiiri ciwaanada dhammaadka buug yaraha).
**Kuxaqiiji in lagu helikaro email ahaan!**
Haddii aad kagurrto deegaanka adiga iyo caruuruba aadna haysan meel aad degto si aad go'aan uga gaarto meeshaad dajin lahayd caruurta, waa inaad codsataa isla marka aad tagto maxkamada qoyska (fiiri bogga 21).

### Waxyaalaha muhiimka ah ood wadanaysid, waad go'aansankartaa inaad kagurrto deegaanka

- Kaarkaaga ama baasaboorkaaga aqoonsiga iyo kuwa caruurtaada
- Shahaadada dhalashada / shahaadada guurka
- Kaargaaga caymiska caafimaadka iyo midka caruurtaada
- Dukumiiintiyada deganaanshahaaga
- Kunturaada kirada
- Kunturaada shaqada / diiwaanada hawlgabka
- Ogaysiisyada xarunta shaqada ama xafiiska bulshada
- Go'aanada guriyeynta
- Caydamaha Bangiga
- Daawooyinka
- Alaabtaada iyo kuwa caruurtaada (dharka, waxyaalaha nadaafada, boonbalayaasha, alaabta iskuulka, caanahooda...)

Makadoonaysaa alaabta guriga aad ugasoo tagtay mar danbe, booliska ayaa kuu raacaayo deegaanka si ay kaaga ilaaliyaan waxkasta oo dhibaato ah.

## Mamnuucida diiwaangalinta iyo macluumaadka deegaankaaga cusub

Ayadoo laraacaayo sharciga federalka ah ee diiwaangalinta, waa inaad kadiiwaan galisaa gurigaaga cusub xafiiska muwaadiniinta mudo 14 maalmood gudohood.

**Haddii aad iska diiwaangaliso hoyga badqabka haweenka**, xafiiska diiwaangalinta ciwaanka ayaa si ootomaatig ah u abuura ogaysiiska waxa loo yaqaano mamnuucida macluumaadka ee shuruudu kuxirantahay. Tani waxay kadhigantahay in xafiiska diiwaangalinta ciwaanka kaliya loo ogolyahay inuu macluumaadka siiyo diiwaanka dad kale ee raba inay ogaadaan meeshaad dagantahay hadii aan adiga iyo caruurtaada halis la galineyn.

**Haddii aad doonayso inaad iskadiiwaangaliso** ciwaanka saaxiib ama qaraabo, tusaale, haddaba waa adigu inaad codsataa mamnuucida macluumaadka. Waa inaad bixisaa sharaxaad faahfaahsan ee sababta aad mamnuucida macluumaadka udalbanaysid.

### Sidee ayuu mamluumaad qarintu ushaqaysaa?

Kahor inta aan xafiiska diiwaanka ciwaanada uusan usheegin dadka kale ciwaankaaga cusub, adiga ayay fasax kuwaydiisanaysaa. Waa inaad haddaba si adag usharaxdaa

in aad waajahayso hanjabaad haliso adag leh haddii macluumaadka diiwaanka lafaafiyo.
Waa inaad magacawdaa, si faahfaahsan, dhamaan sababha cadeynaayo halista siinta ciwaankaaga shaqsiyaadka dalbanaayo. Si aad ugu kuulaysato tan, waa inaad gudbisaa – ilaa iyo aad awoodo– cadeyn waafi ah, sida warbixinada caafimaadka, warbixinada booliska, awaamirta difaaca ee kadhanka ah xadgudubyada muuqda, iwm.

Marka waa inaad sharaxdo taas, tusaale, waxaa kuuhanjabaayo shaqsi gaar ah, horay laguu dhaawacay ama kabaqaayo in lagu waxyeeleeyo.

## Codsiga qarinta macluumaadka

Sida caadi ah, waxaad codsi udirankartaa maamulka kushaqada leh, Xafiiska Muwaadiniinta ee Gobalka iyo sababaha amarka (LABO). Haddii aad caawimaad uga baahantahay arintaan, waxaad latashankartaa xarun latalinta ah (ka fiiri qeybta ciwaanka) ujeedadaan.

Waxaad ka heleysaa foom hoyga haweenka, ee deegaanka aad u qaxday, ama xarunta latalinta. **Si kastaba ha ahaatee, waad qori kartaa codsi caadi ah oo iskaa ah.** Codsiga dhexdiisa, waa inaad qortaa magacaaga, magaca caruurtaada, taariikhaha dhalashada adiga iyo caruurtaada. Haddii aad katimid gobal kale, waa inaad macluumaad qarin kacodsataa ciwaankaagii hore, sidoo kale, sida ugu dhaqsiyaha badan, maadaama macluumaad qarinta Berlin uusan halkaan ka shaqeyn.

Waxaa lagugu wargalinayaa abuurida macluumaad qarinta iyo inta ay soconayso (tusaale, 1/2 sano, 1 sano), ayadoo qoraal ah. Ogoow waqtiga lacayimay; waqtigaas kadib, qarinta macluumaadka si ootomatig ah ayay udhacaysaa. Sidaa awgeed, waa inaad talaabooyin qaadaa si aad udheeraysid, si waqtiyaysan. Waa muhiim inaad wargaliso Xafiska Gobalka ee Muwaadiniinta iyo Awaamirta (LABO) in halistaadii wali taagantahay.

**Sidoo kale waa muhiim inaad codsato xaquuqda deegaan ee caruurtaada**, si markaas macluumaad mamnuucida loodheereeyo si loo difaaco caruurta dambiiluhuna ma awoodi karaayo inuu gurigiina ogaado.
Caruurta, kaliya waxaad codsankartaa macluumaad qarin, haddii aad leedahay xuquuq deegaan oo cad (kafiiri macluumaadka boga 21).

# Dacwadaha dambi

Kadib baaritaanka booliska, dukumiintigaaga warbixinta booliska waxaa lagu wareejinaayaa xafiiska dacwad oogaha guud. Halkaan, waxaa lahubinayaa in xaaladaha wax eedeyntu way kujiraan.

Kadib baaritaanka horudhaca ah, sharciga guud, hawshu waxay usoconaysaa sidan soosocta:

## Joojinta / gabagabeynta hawsha

Sarkaalka- / xafiiska dacwad oogaha guud ayaa joojinaayo hawsha, haday u aragto in cadeynta dambiga aysan ku filneyn. Waxaad gudbin kartaa racfaan kadhan ah joojinta. Waxaa lagu siinayaa talo sharci oo bilaasha h hawshaana quseeya (kafiiri qeybta ciwaanka).

## Eedeyn / Amar Dambi

Haddii sarkaalka- ama xafiiska dacwad ooguhu uu aqbalo cadeynta, waxay gudbinaysaa eeday una gudbinaysaa maxkamada kushaqada leh ama waxay codsanaysaa amar sooxirid.

Amarka sooxirista, dambiilaha waxaa laxukumayaa ayadoon maxkamadu dhagaysan dacwad qoran inuu magdhaw bixiyo ama in laxiro ay soosaarto maxkamad. Kadibna, maxkamadeynta waa ladhamaystiray. Arintaan laguuma sheegaayo, hasayeeshee, waxaad waydiin kartaa sarkaalka- / xafiiska dacwad oogaha, si qoraal ah. **Markaad tahay dhibane fal dambi lagulakacay, waxaad sidoo kale codsankartaa in boolisku ay kuusheegaan waxa kasoo baxay maxkamada dhagaysigeeda.**

# Habka dacwada mackamada

Maxkamada waxay go'an kagaaraysaa inay fasaxdo dacwadeynta ayna taariikh ugoyso dhagaysiga maxkamada. Markay halkaa gaarto, waxaad uga soo qeyb galaysaa marqaati ahaan si lamida dhamaan marqaatiyaasha kale iyo dambiilaha.

Sida caadiga ah, dhagaysiga waxuu dhacayaa sanad gudihiis kadib ugudbinta warbixinta booliska. Maxkamada, waa inaa hadal fahamleh meesha kasheego markale, waayo go'aanka maxkamada waxaa lagu saleyn karaa

kaliya hadalada ay jeediyaan dhamaan dadka kulugleh dhagaysiga. Maxkamadu, sarkaalka- / xafiiska dacwad oogaha guud, lakiin sidoo kale eedaysanaha iyo qareenkiisua waxay kuwaydiin karaan suaalo dheeri ah. **Haddii aad go'aansato in aadan cadeyn aadna adeegsato xaqa aad uleedahay inaadan marag bixin, hadalkaagii hore maxkamadu waxba kama sooqaadayso. Tani waa, adaan cadaymo dheeri ah laheyn, waxay keenaysaa in dambiilaha wax lagu waayo, aana laciqaabin.** Fadlan Ogow: Haddii uusan dambiiluhu xirneyn, si xor ah ayuu guriga maxkamada ugu dhex soconkaraa. Haddii aad kabaqayso inaad kulantaan, waad sugi kartaa ilaa maragaagu soo baxaayo, waxaadna joogi kartaa qolka ilaalsan ee marqaatiga. Fadlan maxkamada ulaxariir si guud (nambarka tleefanka wuxuu kuqoranyahay waraaqaha) oo waydiiso xarunta daryeelka ee marqatiyaasha (kafiiri qeybta ciwaanka). Eedaysanaha si guud wuxuu joogaa qolka maxkamada. Hase yeeshee, marka lagu waraysanaayo, eedaysanaha kulama joogaayo, xaaladaha qaar.

## Lajoogida iyo latalinta xiliga maxkamada

**Dhagaysiga maxkamada waa mid furan.** Xaaladaha qaar, hase yeeshee, waa laga qarinkaraa bulshada qeyb ahaan. Waxaa kuraaci karo, tusaale, daryeele cilmi nafsiga (fiiri bogga 9), qof aad ku kalsoontahay.

Waxaad sidoo codsankartaa talo uu kusiiyo qareen aad adigu aaminsantahay waadna uwakiilankartaa inuu kumatalo. Qareenkaagu wuxuu arki karaa faylalka kahor intaa hawshu bilaaban, wuuna kuuraaci karaa maxkamada. Markasta waa inaad bixisaa qarashaka kubaxaaya tan, si shaqsi ah. Waxaa talo kaasiinkara qarashaadkaan qareenka.

Ayadoo lafiirinaayo marag furka eedaysanaha, marqaatiyaasha iyo, haday muhiim tahay, midka qabiirka, xafiiska dacwad oogaha guud wuxuu soo koobayaa wixii lasheegay wuxuu kusaleynayaa xukunka (qirasho). Haddii uu qareen kumatalaayo, asaga ayaa kiska qeybtaada soo gudbinaayo. Kadibna, dacwoodaha iyo ugu danbeyntii, eedaysanaha ayaa hadalka qaadanaayo.

Intaas kadib, maxkamada waxay gaaraysaa go'aankeeda (xukunka) ayadoo siinaysa edaysanaha

- midkood ganaax lacageed ama
- xukun xabsi, kaasoo sidoo kale leh ganaax badalasho, ama
- waajib kadhigaaya inuu dambiiluhu dhamaysto xiliga xabsiga, ama
- dambiilaha waa lasiideyn karaa haddii cadeyntu aysan kufilneyn in laxukumo.

Hase yeshee, hawsha maxkamada waa lajoojinkaraa waji wadahadalka weyn - tusaale kadhan ah bixinta lacag kaash ah.

## Diiwaangalinta si dhibane iskudhaf ah

Xadgudubyada qaar, Aqoonsiga Dacwad Dambiyedka wuxuu kicinayaa in adigu qofka ladhaawacay ahaan aad kubiiri kartid dacwadaha dambiyada si iskudhaf dhibane ah. Xaaladahaan oo kale, waxaad leedahay xuquuq balaaran, sida xaqa ah inaad suaalo waydiiso inta lagu jiro dacwada kadhanka ah lamaanahaagi hore / xaaskaaga ama qofkii nolosha kula qeybsanaayay, adoo ah dhibane iyo marqaatiba.

Haddii aad maxkamadu bixiso maqaamka dhibane iskudhafida, waxaad sidoo kale codsan kartaa taageero dhaqaale oo sharci ah. Waxaad heli kartaa meesha lagala xariro qareeno qibrad leh kuwaasoo bixiya talo sharci oo bilaash ah adoo umaraayo xarumaha talo siinta haweena (goor hre wac si aad balan uqabsato_. Dhamaan suaalaha guud oo quseeya hawsha waa lacadayn karaa (shaqada qareenka, hawsha taageero dhaqaale ee sharci ah, difaaca, dhibaatooyinka xanuunka iyo il darnaanta iyo saameyntooda dacwada dambiyeedka ay kuleeyihiin...).

# Sharci fulinta - tusaale



# Difaaca xuquuqda madaniga ah

Haddii adiga (iyo caruurtaada) aad noqotaan dhibanayaal xadgudub maxali ah ama hanjabaad, waxaad maxkamada kacodsan kartaa inay difaac idiin samayso ama inay kutajiso deegaan lawadaago. Maxkamada Qoyska waxay leedahay awood. Si aad uhesho awaamiir difaac, waxaad doorankartaa inaad codsi udirato mid kamida maxkamadaha soosocda:

**Maxkamadu waxay kutaalaa degmada**
- dambigu kadhacay,
- degmada uu kuyaalo deegaanka lawadaago, ama
- deegaanka codsadaha / dambiilaha.

Ayadoo degaaN lagusiinaayo (qeybaha 1361 b, iyo 1568 ee BGB ama laymanka 14 iyo 17 LPartG) maxkamadaad rabto iskama dooran kartid; qaabkaan soo socda ayaa loo go'aansadaa:

**Maxkamada,**
- taasoo milkiyada ama laamananimada nolasha kiiskeedu uu kajiray ama yaalo,
- halka uu guriga lamaanaha ama dadka isqaba uu kuyaalo,
- halka guriga eedaysanuhu kuyaalo (dambiile),
- halka guriga codsaduhu kuyaalo (dambiile).

Waxaad dhigi kartaa codsiyada si kumeelgaar ah loogu eego difaacaaga ama si loosii wadoinaad deganaato deegaanka lawadaago kaligaa.
Tan waxaa loo sameyn karaa si madax banaan ee bilowga hawsha maxkamada.

Haddii hada aad waajahayso hanjabaad aadna halis kujirto, waxa loogu yeero dacwada degdega ah, ee sharciga guud, talaabo sharci oo degdeg ah oo sidaas awgeed ah mid raqiis ah ayaa laqaadayaa. Codsiga waa in la qeexo shuruudaha maareyntana laga dhigo kuwo la aamini karo. Sharciga wuxuu doonayaa waxa loogu yeero cadeynta joogtada ah, sidaa awgeed duubista cadeynta way bilaaban kartaa si degdeg ah.

Tani waxay noqon kartaa tusaale shahaadada dhaqtarka ama ku dhawaaqida aqbalaada (dhaar)

waa suuragal in lacodsado in dhagaysiga laqabto ayadoo uusan kujirin eedaysanuhu, si looga dheeraado inaad isku aragtaan dhagaysiga maxkamada. Tan waa in si cad loo cadeeyo.

### Difaaca caruurta

Caruurta, majiraan codsi laga diri karo ayadoo laraacaayo Sharciga Difaaca Xadgudubka. Hase ahaatee, waxaa jira codsiyo kale oo ladirikaro (ayadoo loofiirinaayo § § 1666 iyo 1666 ee BGB (Aqoonsiga Sharciga Federalka): Caruurta jirta 14 iyo kabadan way dirsankaraan codsiyadaan qudhoodu weyna kiraysankaraan qareen.

Waxaa sii dheer, waxaad codsankartaa:

- Waxyeelooyinka xanuunka iyo la ildarnaanta (maxkamada rayidka)
- Qaabeynada guud ee difaaca shaqsiyadaada ayadoo loo fiirinaayo §§ 823, 1004 of ee BGB (Aqoonsiga Sharciga Federalka)
- Deegaanka (maxkamada qoyska)
- ganaaxa xuquuqda laxiriirida iyo galida (maxkamada qoyska).

Waa inaad latashatid qareen kaasoo shaqadiisu tahay sharciga qoyska, ujeedooyinkaana quseeya. Hadaad faqiir tahay, caawimaad dhaqaale ee talinta sharciga / dacwadaha aha ayaa lagu siinkaraa.

**Maadaama hawlaha maxkamada iyo go'aanada halkaan lagu sheegay ay qaadan karaan waqti dheer, sharciyo difaac iyo sharciyada kale ee rayidka ah ayaa lasameyn karaa xaaladaha degdega ah.** Waxaad helaysaa foomamka kuwaasoo fududeynaaya codsigaaga, aadna kaqaadanaysid xarunta latalinta haweenka, ama hoos kasoo dagso: www.big-koordinierung.de/Schutzantrag/

## Awaamirta difaaca

Awaamirta xadidaysa hanjabaadaha-, dhibaateynta-, u imaanshaha-, iyo soo wicida ayaa maxkamadu kusoo rogi kartaa dambiilaha, ayadoo laraacaayo Sharciga Kahortaga Xadgudubka (Gewaltschutzgesetz) sida ku cad§ 1; fee caruurta ayadoo laraacaayo § 1666 BGB (FAqoonsiga Sharciga Federalka). Tusaale, dambiilaha waxaa laga mamnuuci karaa inuu kulasoo xariiro, uu imaado goobtaada shaqada ama gurigaaga, xarunta daryeelka maalintii, ama iskuulka caruurtaada. Booliska ayaa lagu wargaliyaa hawlaha lasamaynaayo ayadoo laraacaayo § 1 ee Sharciga Difaaca xadgudubka (Gewaltschutzgesetz).

Haddii dambiiluhu uu jabiyo amarka difaaca waafaqsan§1 ee Sharciga Difaaca Xadgudubka, wuxuu waajihi karaa eedeyn dacwadeed. Waad wici kartaa booliska (markale) waadna qori kartaa warbixin. Waxaa siidheer, waxaad kacodsankartaa maxkamada inay soo rogto qarsh lacagta maamulka ah. Meelaha qaar, dambiilaha waa laxirikaraa maxkamadu oo uu yasay awgeed (uudiiday inuu uhogaansamo amarka maxkamada).

## Deegaan siinta

Waxaad waydiisankartaa Maxkamada Qoyska **inay degaan kudajiso** ayadoo laraacaayo § 2 ee Sharciga Difaaca Xadgudubka. Gudbinta dambiilaha ayaa lagu dhawaaqi karaa haday jirto halis caruurta kuwaajahan ayadoo laga fiirinaayo § 1666 of the BGB (Aqoonsiga Sharciga Federalka). Haddii aad xaas leedahay ama aad xiriir sharci ah laleedahay qof, waxaad codsankartaa in lagu dajiyo guri / deegaan aad lamaane kuyeelato, ayadoo laraacaayo § 1361 b BGB (Aqoonsiga Sharciga Federalka) ama deegaan ayadoo laraacaayo § 14 ee aad si shaqsi ah u isticmaalayso. Shuruuda waa inaad rabto inaad kala tagtaan ama aad markii horaba aad kala tagsanaydeen, deegaan siintu waa umuhiim si looga dheeraado 'dhibaato aan laqaadi karin'. Isla waqtiga dajinta guriga laguu sameeyo, dambiilaha waxaa laga mamnuuci karaa inuu joojiyo kirada ama kunturaad kasta oo laxiriirta deegaanka, ama inuu kugu adkeeyo inaad guriga adeegsato.

**Matahay shaqsiga kaliya ee guriga kiraystay ulana nooshahay midow waqti leh (rajid ah) ood** aadna lanooshahay dambiilaha, waxaad kacodsankartaa Maxkamada Qoyska inay deegaanka adiga kuu xukunto. Haddii labadiinuba aad saxiixdeen heshiiska / heshiiska kirada, waa inaad latashataa qareen, haddii dambiilaha xoog looga saarikaro guriga. Maxkamadu way awoodaa, hase yeeshee, inay gurigaan hal qof dajiso ugu yaraan waqti kooban, xaaladkasta. Dookhaan waa furanyahay xataa haddii heshiiska / heshiiska kirada uu galay kaliya dambiiluhu.

Waxaa siidheer, waxaa jiro markasta suurtagalnimada inaad hesho amar xadidaaya galitaanka **xadgudubka, hanjabaada, dhibaateynta iyo lasoo xariirida** (ayna kujirto inuu kuuyimaado) ayadoo laraacaayo hababka degdega ah ee waafaqsan § 1 ee Sharciga Difaaca Xadgudubka. Fadlan ogoow awaamirta ay maxkamadu xukuntay ee waafaqsan Sharciga Difaaca Xadgudubka, kuwaasoo la sameeyay

ayadoo dhagaysi afka ah lasameyn, waa inuu gudbiyaa sharci yaqaan maxkamada kasocda. Haddii aad uqalanto caawimaad sharci, waa inaad codasataa qiimaha codsigii hore aadna kulifaaqdaa codsigaaga. Goaanada ayadoo laraacayo § 2 ee Sharciga Difaaca Xadgudubka (uisticmaalka guriga wadaaga ah) awaxaa la ogaysiiyaa Booliska iyo Xafiiska Fayadhawrka Dhalinyara.

## Guriga sharciga ah

Caruurta waxaa markasta saameeya xadgudubka ay goobjooga kayihiin. Haddii aad kukala tagaysaan sabab laxiriirta xadgudub uu kukacay lamaanahaaga ama haddii aad raadinayso talaabooyin maxkamadeed si aad difaac uhesho adna rabto inaad caruurtaada ka ilaaliso halis kale faya qabkooda, waxaad kacodsankartaa Maxkamada Qoyska ee kushaqada leh ee xaqa kumeelgaarka ah inay deegaanka caruurta go'aamiso, ama ay usamayso xanaano qeyb ahaan gaar ah usamayso caruurtaada. Tani waxaa loo sameyn karaa si kamadaxbanaan gudbinta waraaqda furitaanka. Waxaa sidoo kale jiri kara waajib saaran maxkamada oo ah inay soo faragaliso si caruurta loo difaaco. Tusaale, ayadoo laraacaayo §§ 1666 iyo 1666 ee BGB, dambiilaha waa laga mamnuuci karaa inuu guriga daganaado, waxaa lasiin karaa xanibaad dhanka xariirka ah, ama laga xayuubiyo xaqa uu deegaanka kudaganaankaro, iwm.

## Xuquuqda galitaanka (xaqa soobooqshada)

Ayadoon laga fiirinayn guri siinta, aabuhu wuxuu xaq uleeyahay caadiyan inuu caruurtiisa soo booqdo. Haday jirto halis adiga iyo caruurta idinkaga imaankarta ee habdhaqan xumo dheeraad ah ama haddii caruurta uu xadgudubku kureebay saameyn, waxaad kacodsankartaa Maxkamada Qoyska ganaax kumeelgaar ah ama aan xad laheyn ama udiidid xaqa uu uleeyahay inuu soobooqdo. Badanaa, maxkamadu waxay amartaa **booqasho tilmaan leh**, tani waxay kadhigantahay in booqashada waalidku dhacayso ayadoo uu joogo qof kushaqo leh ama xubin / shaqaale kamida xafiiska fayadhawrka dhalinyarada ama xarumaha kale.. Dhamaan aabayaasha caruurta hooyadood qaba (xaaska hooyada ee hada / hore) waxay xaq uleeyhiin inay caruutooda booqdaan, haddii caruurtu ay mudo dheer lanoolaayeen isku guriga wada joogeen tanina ay caruurta maxlaxadooda ugu wanaagsan tahay. Haddii aabaha noocaan ah uu caruurta dili jiray ama adiga, waxaad codsan kartaa in latuuro ama loodiido xaqiisa soobooqashada. Waxaad sidoo kale codsankartaa amarka maxkamada ee booqasho lakormeeraayo (uu lasocdo qof sadexaad).

Waalidiinta waaweyn (ayeeyo, awoowe) iyo caruurta yaryar waxay sidoo kale xaq uleeyihiin inay soobooqdaan caruurta, ilaa iyo inta booqashadaasi ay dan utahay faya qabka caruurta. Fikirka, gaar ahaan, midka awoowayaasha ee ku aadan dambiga uu aabuhu kukacay, waa in latixgaliyaa.

Haday magac ahaan inkiraan jiritaanka in caruurtu faya qabkooda uu haklis kujiro uuna halis galinaayo aabaha, ama haday isku dayaan inay qariyaan dambigiisa, kuwaasi waxay keenayaan in loo diido, la cayrsho ama lakor oogteeyo booqashadooda, si caruurta loo difaaco.

Waxaad codsankartaa in dambiilaha caruurtaada uusan u imaan karin isla waqtiga aad difaaca codsanayso. Haddii kale, suura gal manoqonayso n laga hortago in dambiiluhu uu caruurta u imaado marka caruurta laweejinaayo, ama inuu kudhibo ama uu kuuhanjabo waqtigaas. Haddii ay horay ujirtay amar maxkamadeed, waa inaad Maxkamada Talaabada Koobaad usheegto amarka si laguu difaaco, isla markana aad codsataa fulinta go'aanii lagaaray. **Macluumaad faahfaahsan ayaa laga helayaa qoraalka 'booqashada lakorjoogteeyo' ayna samayso BIG e. V.**

## Hawsha qusaysa xaaladaha caruurta

Sharciga Hawsha Xaaladaha Qoyska iyo Xaaladaha awoodaha aan laga murmi karin (FamFG) waxaa ladhaqan galiyay 01.09.09.
Ayadoo Sharciga laraacaayo, xeerarka soosocda ayaa quseeya:

### Xeerka socodsiinta (§ 155 FamFG)

Xaaladaha ee ka go'aangaarida deegaanka, xaquuqda booqashada iyo fasaxida ilmaha, si lamidana halista ku imaanaysa faya qabka ilmaha (§§ 1666 iyo 1666 BGB) iayaa lo baahanyahay si loo siiwado hab dhaqso leh muhiimadna loo siiyo ayadoo laga hormarinaayo dhamaan waxyaabaha qoyska ayadoo la ilaalinaayo hababka saxda ah. Tani waxaa weeye ugu danbeyn mudo bil ah kadib markii hawsha labilaabay waa in xiliga maxkamada ladajiyaa. Dib udhiga codsiyada waxaa la aqbalikaraa kaliya xaalado gaar ah. Sababta dib udhaca codsiga waa in macquul tahay.

Xiligaan dhanacyada (haday muhiim tahay uulasocdo qareenoodu), Xafiiska Fayadhawrka Dhalinyara iyo sida suuragalka ah kaaliyaha amar horay loo bixiyay waa inay maxkamada joogaan. Maxkamadu sidoo kale waxay

caadiyan dhagaysataa caruurta.
Hooyooyinka xadgudubka lagula kacay, kulankaan aydoo laga fiirinaayo waqtiga xadgudubkaan ayaga kadhanka ah, waxay keeni kartaa isdifaacid shaqsi ah oo macquul ah. Dhagaysi iskudhaf ah waxay baabi'in kartaa halista amaan. Codsiyada quseeya dib udhaca iyo latashiga gaarka ah waa in lasababeeyaa macquulna ay noqdaan. Cadee in xadgudub guriga ah lagugula kacay. Maxkamada dhexdeeda, fadlan cadee in heshiis booqasho inuu kahor imaanaayo xeerarka Sharciga Difaaca Xadgudubka. Xiliga laqabanaayo waraysiga iskudhafka ah laguna qabanaayo Xafiiska Fayadhawrka Dhalinyarada ee lala yeelanaayo dambiilaha sidoo kale halis ayuu kugu yahay wuxuuna kahor imaan karaa amarka difaaca.

## Ka shaqeynta heshiis (§ 156 FamFG)

arinta masuuliyada waalidka, meesha ladagaayo, xuquuqda booqashada si wareejinta caruurta

**Maxkamada**

- waxay ka shaqeynaysaa in lahelo heshiis (tusaale, waalidiinta ayaa heshiiya)
- cadee dookha dalbashada talo, gaar ahaana u imaanshiyaha la ogolaankaro ayadoo laga fiirinaayo shaqada xanaanada waalidnimo / masuuliyada.
- sheeg suurta galnimada in la idin dhexdhexaadiyo.

**Maxkamadu waxay**

- amri kartaa latalin
- waxay qorikartaa ayna sharciyan meelmarinkartaa heshiis laba dhinac.

**Maxkamada**

- waa inay kadoodaa fulinta amar kumeelgaar ah hadaan heshiis lagaari karin.

Waxay xaq uleedahay in sharci kadhigto ama diido xaqa booqashada ayadoo umaraysa xanibaad kumeelgaar ah, markay amrayso talo ama dib u eegis. Xaaladaha xadgudubka maxaliga ah, gaarida heshiis la tixgaliaayo, maadaama aan laxaqiijinkarin in dambiiluhu uu kudhaqmaayo heshiiska. Maxkamada waa in laxasuusiyaa xiriirka arintaan ee sharciga § 156 ee FamFG.

## Waxyeelooyinka xanuunka iyo la ildarnaanta

Xaqa aad uleedahay magdhaw waxaa kamida badalsiinta hantida sida qiimaha qarashka daaweynta, khasaarooyinka dhaqaale oo ay keentay lumin dhaqaale ama qarashka badal siinta maryaha lajeexjeexay iyo alaabta laburburiyay. Sheegashada dhibaatooyin waxaa lagu saleeyaa qanacsanaan iyo magdhawga dhibaatooyinka sida dhaawacyada, xanuunka, bahdilka.

# Maxkamadaha Qoysku:

## Pankow / Weissensee

**Waxay masuul kayihiin degmooyinka:**
Dhexe (Middle Tiergarten, Wedding),
Pankow (Pankow, Weissensee, Prenzlauer Berg),
Reinickendorf
Kissingen Str. 05-jun
Berlin-Pankow 13189
Teleefoonka: (030) 9 02 45-0
Xafiiska Macluumaadka iyo Codsiyada Sharciga, 1st floor, qolka B-2, Saacadaha uu furanyahay Isniin- Jamco. 9:00 AM - 1:00 PM, Khamiista. 3:00 PM- 6:00 PM (loogu talagalay dadka shaqeynaaya)

## Schöneberg

**Waxay masuul kayihiin degmooyinka:**
Steglitz-Zehlendorf iyo Schöneberg
Grunewaldstr. 66–67
Berlin, Germany 10823
Teleefoonka: (030) 9 01 59-0
Xafiiska Macluumaadka iyo Codsiyada Sharciga, qolka 11, Saacadaha uu furanyahay Isniin- Jamco. 9:00 AM - 1:00 PM, Khamiista. 3:00 PM- 6:00 PM (loogu talagalay dadka shaqeynaaya)

## Köpenick

**Masuul waxay katahay Treptow / Köpenick**
6 Mandrellaplatz
Berlin 12555
Telka. (030) 9 02 47-0
Xafiiska Macluumaadka iyo Codsiyada Sharciga, Qolka? Waqtiga lafuro waa Isniin- Jamco. 9:00 AM - 1:00 PM, Khamiista. 3:00 PM- 6:00 PM (loogu talagalay dadka shaqeynaaya)

## Tempelhof - Kreuzberg

**Waxay masuul katahay dhamaan degmooyinka kale:**
62 Hallesches Ufer
Berlin-Kreuzberg 10963
Teleefoonka: (030) 9 01 75-0
Xafiiska Macluumaadka iyo Codsiyada Sharciga, Qolka F020 - F029,
saacadah ay furantahay Isniin- Arbaco 8:30 AM - 3:00 PM, Kamiista. 14:00 - 18:00, Fr. 8.30 AM - 1.00 PM

## Maxkamada Caadalada Dambiyada:
Tiergarten, Telka.: (030) 90 14-0

## Hoyga Haweenka:

- Hoyga haweenka waa la ilaalshaa, waxay guri kumeelgaar ah utahay haweenka (iyo caruurtooda) ee jinsiyad kasta.
- Waad wicikartaa hoyga haweenka maalin iyo habeenba.
- Ciwaanka ee hoyga haweenka waa laqariyaa.
- Raga looma ogola gudaha hoyga.
- Joogista hoyga haweenka waa bilaash; Adiga ayaa xanaaynaaya / u adeegaaya caruurtaada iyo naftaadaba.
- Xarunta magangalyada haweenka, si faham leh ayaa laguula talinayaa laguuna taageerayaa.
- Joogista hoyga haweenka makeenayso furiin toos ah, mana jiro wax lagu wargalinaayo maamulka socdaalka.

**2. Hoy Haween oo Madaxbanaan,** Telka.: (030) 37 49 06 22

**Hoy Haweenka ee Hestia,** Telka.: (030) 559 35 31

**Hoy Haweenka ee Cocoon,** Telka.: (030) 91 61 18 36

**Hoy Haweenka ee BORA,** Telka.: (030) 986 43 32, qolal curyaanka ufiican

**Hoy Haweenka ee CARITAS,** Telka.: (030) 851 10 18
Deegaameynta dhagoolka

**Hoy Haweenka ee Isdhexgalka,** Telka.: (030) 80 10 80 50

## Talo - iyo xarumo qabasho

waxay bixiyaan talooyin sharci iyo bulsh, teleefanka iyo si shaqsiyaba waa lagugu siinayaa
- waxaana lasiinayaa haweenka dhibanaha ah ee xadgudubka guriga
- waxay kubarayaan booliska iyo talaabooyinka sharciga
- waxay kusiinayaan hoy haweenka leeyihiin iyo dookhyo dajin guri amaan ah
- waxay kaataageerayaan inaad xafiisyada lahadasho iyo inaad guri hesho

- waxay kusiinayaan talo sharci, qibradaha kooxda, iyo qeyb ahaan xanaano caruurta, iyo waxyaale kale.

Wadatashiyada waa sir, waana bilaash, waxaana kusiinaaya shaqaale cilmi uleh luuqadaha shisheeye iyo luuqad dhagoolka xirfad uleh sidoo kale turjumaano haddi baahi looqabo.

**XarntaLatalinta Haweenka ee TARA,** Telka.: (030) 787 18 340 Advice in English, Persian, Turkish iyo Afgan (Dari) languages

**Frauenraum (Xarunta haweenka)** Telka.: (030) 448 45 28 Talosiin Ingiriis kubaxaysa, sidoo kale

**Xarunta Latalinta Haweenka ee BORA,** Telka.: (030) 927 47 07
Talo siin luuqada Ingiriiska kubaxaysa, luuqada Faransiiska

**Meesha ay Kukulmaan Haweenka,**
Telka.: (030) 622 22 60
SMS: 0151-567 40 945
Talasiinta kubaxay luuqadaha Ingiriiska iyo Faransiiska, iyo si lamida luuqad dhagoolka

**Talosiinta Haweenka ee Isdhexgalka,** Telka.: (030) 80 19 59 80 Talosiinta waxaa lagu baxshaa sidoo kale luuqadaha Armenianka, Ingiriiska, Persianka, iyo dhamaan luuqadaha Yugoslav. Meel galikaraan curyaanka

## Guri amaan ah

**Qolka'Haweenka e. V.,** Telka.: (030) 787 50 15, Helitaanka gaari curyaanka

**Hestia E.v.,** Teka.: (030) 440 60 58

**Zuff E.v.,** Telka.: (030) 694 60 67 + (030) 787 18 340

**Xarunta Haweenka - Augusta,** guriyaynta dhagoolayaasha
Teleefoonka: (030) 28 59 89 46 77 iyo (030) 60 02 17
Fax (030) 28 59 89 46, 78 iyo (030) 60 02 17
SMS: 0160-666 37 78

**Mashruuca Isdhexgalka dadka Deegaanka,**
Telka.: 80 10 80 10

Xarumahaan, waxaad helikartaa macluumaad (sharci) bilaash ah iyo taageero:

## Qeybo gaar ah ee talo iyo macluumaadba ah:

**LARA,** Xafiiska Kahortaga Xadgudubka Galmo ee Kadhanka ah Haweenka
Teleefoonka: (030) 216 88 88 (Leenka)
Xarunta dhibaatada iyo talasiinta ee haweenka kufsiga galmo loogaystay

**Wild Water e. V.,** Telka.: (030) 693 91 92
Iscaawinta shaqsiga ah ee haweenka iyo latalinta haweenka kuwaasoo xadgudub galmo loogaystay caruurnimadoodii

**Xarunta Qaxweynta Haweenka ee Habeynkii - goobta dhibaatooyinka ee habeynkii** Telka.: (030) 61 62 09 70
14 Maresch Str., Berlin 12055
Saacadaha lafuraayo: Jamco ilaa Sabti: 8:00 PM - 2:00 AM, Sabtida ilaa Axada.: 8:00 PM- 2:00 AM, Arbacada ilaa Khamiista: 7:00 PM - 1:00 AM

**Ururka Hawwenka Curyaamiinta ah ee Berlin e. V.,**
Teleefoonka: (030) 617 09 167 / (030) 617 09 168 / 169

**Ban Ying,** Telka.: (030) 440 63 73/74
Xarunta Iskuxirka iyo Talasiinta ee ladagaalanka Dhoofinta Dadka

**Al Nadi,** Tekal.: (030) 852 06 02
Goobta kulanka iyo Talsiinta Haweenka Carabta ah

**HÎNBÛN,** Telka.: (030) 336 66 62
Xarunta Waxbarashada iyo Latalinta ee Haweenka Kurdida ah

**Ee kutaala VIA,**Telka.: (030) 66633487
Mobile: 0177 738 62 76
Xarunta Latalinta Haweenka ay saamaysay dhoofinta dadku

**TIO,** Telka.: (030) 624 10 11
Goobta Kulanka iyo Iswaraysiga ee Haweenka Turkishka ah

**EWA Xarunta Haweenka,**Telka.: (030) 442 55 42
Macluumaadka Sharciga iyo latalinta guud

## Adeegyada degdega ah ee difaaca caruurta

**Saacad kasta lahelikaro**
**Leenka difaaca Caruurta ,** Telka.: (030) 61 00 66
**Adeega Degdega ah ee Caruurta,** Telka.: (030) 61 00 61
**YAdeega Degdega ah ee Dhalinyarada,**
Telka.: (030) 61 00 62
**Adeega Degdega ah ee Gabdhaha,** Telka.: (030) 61 00 63

## Adeegyada Latalinta Difaaca Marqaatiga iyo Dhibanaha:

**Caawinta Dhibanayaasha,** Telka.: (030) 395 28 67
Xarunta Latalinta Dhibanaaysha Dambiga

**Taageerida Marqaatiga ee Maxkamada Degmada Tiergarten Park iyo Maxkamada Degmada Berlin.**
Teleefoonka: (030) 90 14-34 98/90 14 32 06

**Kuusha Cad,** Telka.: (030) 833 70 60

**Wild Water e. V.,** Telka.: (030) 2 82 44 27
Xarunta Latalinta Gabdhaha Bartamaha Berlin Taageerida Marqaatiga ee Gabdhaha kuwaasoo ah dhibanayaal xadgudub galmo, oo go'aansaday inay gudbiyaan.

**Thaw, xarunta raga loogaystay xadgudubka galmo markuu wiilka ahaa**
Phone: (030) 693 80 07, Tue 4:00 PM - 6: 00 PM, Arbacada 10:00 AM -1:00 PM iyo Khamiista 5:00 PM - 7:00 PM

## Adeegyo latalin ee dambiilayaasha xadgudbka maxaliga ah:

**Latalinta nimanka - ee kadhanka ah dambiga**
Teleefoonka: (030) 785 98 25, mobile: 0170 / 380 18 14

**XARUNTA Berlin ee Kahortaga Xadgudubka - BZfG e. V.**
Teleefoonka: (030) 95 61 38 38

## Adeegyo Latalin ee Haweenka iyo Nimanka Qaniisiinta ah:

**Xarunta latalinta Haweenka Qaniisinta ah**
Teleefoonka: (030) 217 27 53

**Maneo**
**Xarunta Latalinta Nimanka Qaniisiinta ah**
Teleefoonka: (030) 216 33 36
Maalinkasta 5:00 PM - to 7 PM

## Adeegyo kale oo Latalinta ah:

**Jooji hanjabaada**
8 Albrechtstrasse
Berlin 12165
Telka. (030) 22 19 22 000
info@stop-stalking-Berlin.de

**Dameynta dagaalka lamaanaha si wada jir ah**
**Xarunta Talosiinta Qoyska ee Caritas**
18 Great Hamburger Str.
Berlin 10115
Telka. (030) 66 633 470
Famlienberatung.Mitte@Caritas-Berlin.de

**Talosiinta iyo difaaca caruurta iyo qoyskooda kadib marka dagaalka ladhameeyay**
**Ilaalinta Caruurta**
15 Theo Str.
Berlin 12053
Telka. 015114 64 87 55

**Xarunta Caafimaadka Aabalaasta ee Difaaca Xadgudubka ee Charité**
62 Birken Str., HS. N
Berlin 10559
Teleefoonka: 030-450 570 270
Fax: 030 – 450 7 570 270
Gewaltschutz-ambulanz@charite.de
www.gewaltschutz-ambulanz.charite.de

# Xarunta Wicitaanka talasiinta ee Berlin

**BIG** HOTLINE 030.611 03 00

Bei häuslicher Gewalt · Hilfe für Frauen und ihre Kinder

waxaa lahelayaa maalinkasta - xataa maalmaha dabayaaqada asbuuca iyo fasaxyada- **saacad kasta**. Turjumaano ayaa lahelayaa haddii loobaahdo.

Shaqaalaha BIG leenkooda ayaa lataliyo haweenka waayahaaya xadgudubyada guriga ah, iyo sidoo kale dadka ayaga lajoogay. Khubarada suaalaha kaqaba xadgudubyada guriga kadhaca sababtoo ah shaqooyinkooda, waxay wicikaraan leenka BIG. Leenka shaqaalaha BIG wuxuu bixiyaa adeegyo sida soofaragalinta dhibaatooyinka, wuxuna bixiyaa deegaan amaan ah iyo adeegyada kale ee taageero. Waxaa siidheer, waxay wargaliyaan booliska iyo haayadaha sharciga. Adeega kaabida waa xiriirka moobilka. Haddii talada telefanka aysan kugu filneyn, shaqaale ayaa si shaqsi ah kuula talinkara.

Leenka BIG waxaa lagu fulinayaa yadoo wadashaqeyn dhaw lalayeelanaayo talo siin gaar ah - iyo wakaaladaha wax caawiya: Goobta Kulanka Haweenka, Xarunta Haweenka, Tara, Bora iyo xarunta isdhexgalka

**Xadgudubka guriga kadhaca maaha arin shaqsi ah!**
**Uraadi caawimaad naftaada iyo ilmahaaga!**

**030.611 03 00**